# Waxyeeleyaasha Kiimiko ah

**Waxyeeleyaasha dagaalka ee kiimiko ah waa naqasyo, hooreyaal/dareereyaal ama adkeyaal sumeyn kara dadka, xayawaanka iyo dhirta. Waxyeeleyaasha dagaalka ee kiimiko ah waxay sababi karaan dhaawacyo ama dhimasho. Sida ay dhaawacyadu u culus yihiin waxay ku xidhan tahay nooca kiimikada, qadarkeeda iyo dhererka mudada soo-gaadhista.**

## Waa maxay waxyeeleyaal kiimiko ah?

- Waxyeeleyaasha dagaalka ee kiimiko ah ee ugu badan waa salfar mastadh (sulfur mustard) (mustard gas) iyo waxyeeyeyaasha dareemeyaasha/nerfaha sida Sarin iyo VX. Waxyeeleyaashaas caadi ahaan waxa loo soo daayaa uumi/ceeryaan ama hoore ahaan. Marka uu jiro weerar kiimiko la adeegsanayo, halista ugu weyni waxay ka timaadaa uumiga/ceeryaanta sunta oo la neefsado. Haddii qadar weyn oo ah kiimiko loo sii daayo buufis ahaan, waxa laga yaabaa in maqaarka dadka ay u banaan yihiin oo uu soo gaadho waxyeelaha kiimiko oo ah dhibco yaryar.

## Salfar mastadh: astaamaha iyo daweynta

- Salfar mastadh waxay sababi kartaa in maqaarku noqdo mid cas oo xajiimeysan. Qadaro sii waaweyn oo ah sunta waxay maqaarka u keeni karaan finan biyo leh.
- Salfar mastadh waxay dhaawici kartaa indhahaaga iyada oo keenaysa xajiin, casaan iyo barar ku dhaca galka indhaha.
- Salfar mastadh oo la neefsado waxay keeni kartaa xajiin ah cunaha, xanuun ah sanbuuqda ama dulalka sanka iyo qufac. Qadaro waaweyn oo la neefsado waxay dhaawici kartaa sambabada.
- Haddii uu ku soo gaadho salfar mastadh, waxa laga yaabaa inay qaadato afar ilaa sideed saacadood ka hor inta aanad dareemin astaamo. Hase yeeshee, ka dib soo-gaadhis iska yar, astaamuhu waxay qaadan karaa ilaa 24 saacadood si ay u soo baxaan.
- Shaqaalaha caafimaadku waxay kugu daweyn karaan labeen  qaboojin, dhibco lagu shubo indhaha iyo dawo xanuun. Haddii caabuq yimaado, waxa lagu siin karaa antibiyootiko.

## Waxyeeleyaasha dareemeyaasha/nerfaha: astaamaha iyo daweynta

- Qadar yar oo ah uumiga/ceeryaanta sunta ayaa wiilka isha yareyn kara ama isku dari kara aragga, oo sababi kara xanuun indho, san duuf leh ama neefsashada oo gaaban.
- Qadaro dhexdhexaad ah oo ah uumiga/ceeryaanta sunta waxay sababi karaan tabar-dari muruq, lallabo/yalaalugo, matag iyo shuban.
- Soo-gaadhista qadaro waaweyn oo ah uumiga/ceeryaanta sunta waxay sababi karan neefsashada oo joogsata, tabar-dari muruq, miyirka oo luma, gariir iyo dhimasho.
- Saameynta suntu waxay caadi ahaan soo baxdaa sekanno ilaa daqiiqado ka dib neefsashada uumiga waxyeelaha dareemeyaasha/nerfaha.
- Soo-gaadhista qadaro yaryar oo ah uumiga/ceeryaanta sunta waxay sababi kartaa wiilka isha oo ka yaraada inta caadi ah. Tan dhicitaankeedu waxa uu qaadan karaa ilaa hal saac.
- Haddii uu ku soo gaadho qadar weyn oo ah waxyeelaha dareemeyaasha/nerfaha oo aad leedahay san duuf leh, neefsashada oo dhib ah, ama lallabo iyo matag, waxa laga yaabaa in lagu siiyo dawooyinka *atropine* ama *pralidoxime*.

## Waxa aad sameyn doontid haddii uu jiro weerar kiimiko ah

- Haddii uu jiro weerar kiimiko ah, mas'uuliyiinta dawladdu waxay kuu sheegi doonaan inaad aagga isla markiiba ka qaxdid ama raadsatid gabood.
- Haddii aad leedahay astaamaha soo-gaadhista, isla markiiba wac 9-1-1.
- Haddii aad joogtay dibadda ka hor inta aanad ka galin gabood oo aad u maleynaysid inuu ku soo gaadhay waxyeele kiimiko ah:
  - Iska saar dharka sare, ku rid boorso caag ah oo xidh boorsada. Shaqaalaha degdegga u sheeg boorsada aad xidhay si ay qaadaan si ammaan ah.
  - Qubeyso ama qaado qubeys qabow (ha isticmaalin biyo kulul). Isticmaal saabuun badan. Saabuunta ha galin indhahaaga.
- Haddii aad ka tagtid aagga, shaqaalaha degdegga ama shaqaalaha caafimaadka ee jooga goobtaada cusub u sheeg inay ku soo gaadhay suntu.


Washington State Department of Health

Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Washington

PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
**www.doh.wa.gov**

360-236-4027
(800) 525-0127



DOH Pub 821-019
Somali